

Sharciga L. 2 - 1 Disember 1957
Jinsiyadda asalka Soomaaliyeed

MAAMULUHU

Markuu arkay ansixinta Golaha Xeerdejinta

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda:

Qod. 1

Jinsiyadda Asalka Soomaaliyeed

Waxaa muwaadin Soomaaliyeed ah:

- a) — wiil aabbe Soomaaliyeed oo asal ahaan ka soo jeedo Dhulka Soomaaliya;
- b) — wiil aabbe Soomaaliyeed asal ahaan aan ka soo jeedin Dhulka Soomaaliya; oo goorta dhaqangalka sharcigan ay jirto in uu degaan jooqto ah ka doortay Dhulkaas.

Qod. 2

Luminta Jinsiyadda Soomaaliyeed

Waxaa jinsiyadda soomaaliyeed, ee asalka luminaya:

- a) — muwaadinka oggolaada ama sii-haysta, haddii uu qaatay ka hor dhaqangalka Sharcigan, jinsiyad ajnabi (shisheeye);
- b) — muwaadinka, oo asaga oo aan shaqo ka oggolaan Xukuumad dibedda ama asaga oo galay shaqo ciidan, ee quwad shisheeye, ku sii-adkeysta, inkasta oo loogu baaqay inuu kaga tago, muddo mucayan ah gudaheed, shaqada ama adeegga;
- c) — muwaadinadda ay caddaato in ay heshiis guur la gashay nin ajnabi ah.

Qod. 3

Dib-u-qaadashada jinsiyadda asalka

Qofka lumiyey jinsiyadda soomaaliyeed. Ee asalka ah, waxa uu dib-ugu-qaadan karaa dalab (codsi). SÍ kastab, waa in uu caddeeyo in uu ka tanaasulayo wixii jinsiyad ajnabi ah, ee uu qaatay.

Qod. 4

Soomaali asal ahaan ka soo Jeedda Dhul muwaadiniin Dowlado kale

Qof kasta oo ku sugan xaaladaha ku xusan xarafka a), ee Qod. 1aad, xataa haddii uu yahay muwaadin Dowlad ajnabi ah, waxa uu ku naalloonayaa, Dhulka gudahiisa, dhammaan xuquuqda madaniga, ee muwaadiniinta, marka laga reebo kuwa la xiriira in uu qabto mansan hoggaamin dadweyne oo leh dabeecad siyaasadeed iyo ciidan (**militari**), waxa kaloo uu codsi ku heli karaa (qaadan karaa) jinsiyadda soomaaliyeed, bishardi in uu ka tanaasulo midda ajnabiga ah.

Qod. 5

Soomaali aan ka soo Jeedin Dhulka

Wiil kasta oo uu dhalay aabbe soomaaliyeed oo aan asal ahaan ka soo jeedin Dhulka, xaaa haddii uu yahay muwaadin Dowlad ajnabi ah, waxa uu ku naalloonayaa dhammaan

xuquuqda madaniga ah, ee muwaadiniita, marka laga reebo kuwa la xiriira in uu qabto mansab hoggaamin dadweyne oo leh dabeecad siyaasadeed iyo ciida (**militari**).

Waxaa kale ee uu, dalab (codsi) ku qaadan jinsiyadda soomaaliyeed, markaas waa in uu caddeeyo in uu degaankiisa iyo degaan-hawleedkiisa u wareejiyey Dhulka gudahiisa iyo in uu ka tanaasulay wixii jinsiyad kale ah oo qaatay.

Qod. 6
Xeerarka Nidaameed

Hababka (qaababka) fulinta Sharcigan, haddii loo loo baahdo, waxaa lagu dejinayaa xeerar nidaameed.

Qod. 7

Sharcigan waxa uu dhaqangelayaa laga bilaabo marka lagu nashriyo Faafinta Rasmiga, ee Soomaaliya. Qof kasta waxa khasab ku ah in uu dhowro una kuna khasbo in loo dhowro sida sharci Soomaaliya leedahay.

Muqdisho, 1 Disember 1957.

Ku-Simaha Maamulaha

Piero Franca

Cabdullahi Ciise Maxamuud

Hagi Muuse Boqor